Ministère des Affaires sociales et de l'Emploi

# *Ku Cusub Dalka* Nederland

**Waraqadahaan waxaad ka aqrisaneysa waxyaalaha lagaa rabo in aad habeysid markaad Nederland timaado**
Waxaa tusaalo ahaan lagaa rabaa in aad Dowlada Hoose aadid. Waxaan ka wadna Dowlada hoose ee degmadda aad deggantahay.

**Waxaa xataa ku qoran arrimo ku saabsan shaqada**
Dhinaca xeerarka. Iyo waxa aad sameyn kartid hadii ay waxyaalo qaldanyihiin.

**Waxaad xataa aqrisaneysa caadooyinka dalka Nederland iyo**
Sidaa aa n iskula dhaqanno.

**Waxaa xataa gali karta internetka**
Internetka badana waxaa ku yaal warbixin dheeraad ah. Waxaa qoraalkaan ku qoran website-yada aad ka heli kartid. Laakin mar walba ma ahan. Badanaa website-yada waxay ku qoran yihiin afka ingiriisiga.

# Maxaa lagaa rabaa in aad dhameysid?

## Waxaad aadeysaa aqalka degmada

### Markaad Nederland imaadid waxaa lagaa rabaa in aad

Waxaa 5 maalmood gudahooda lagaa raba in aad u tagtid xafiiska Dowlada Hoose. Dowlada Hoose waxaad u sheegee in aad halkaan soo dageysid. Dowlada Hoose waxay magacaaga galineysa kombuyuutarka. Tan waxaa u naqaana diiwaangalin. Markii lagu diiwaangaliyo waxaa ku leedahay xaquuq iyo waajibaad Degmada aad deggan tahay.

### Qoyskaaga wey ku raacaayaan

Qof walba oo qoyskaaga ka mid ah oo Nederland soo deggaayo, inuu aadaa  sida xaaskaaga iyo caruurtaada.

### Waxaad soo qaadanee dukumiintis

- Qof walbo hal baasaboor. Ama kaar aqoonsi kale. Warqadaha waxaa la rabaa in eysan dhacsaneyn.
- Warqada qandaraaska  gurigaaga ee Nederland: warqada qandaraaska ijaarka ama warqada qandaraaska iibka.
- Qof maa la deggan tahay guriga?
  - o Qofkaas warqad u soo qoraa in aad meeshaas deggan tahay.
  - o Qofkaas aa warqada saxiixaayo.
  - o Waxaad soo qaadaneysa koobi oo baasaboorkiisa ah. Ama koobi oo ah kaarkiisa aqoonsiga.

### Waxay Dowlada Hoose ku siineysa lambar

Waxaa anaga u naqaana lambarkaas Burgerservicenummer (BSN). Marar badan aad u baahan tahay lambarkaas. Tusaal ahaan waxaa ugu baahan tahay shaqada ama isbitaalka.

### Dowlada Hoose waxaa u sheygeysaa in aad guureysid

Wadan kale maa u guureysaa? Markaas waxaa u sheegeysaa Dowladaada Hoose . Dowlad Hoose kale oo ku dhextaal Nederland maa u guureysa? Markaas waxaa u sheegeysaa degmada aad ka guureysid, waxaana iska diiwaangalineysa degmada aad soo guurtay.

## Waxaa waajib ah in aad bulshada dhex gashid (*inburgeren*)

### Inburgeren waxaa waaye barashada dalka Nederland

Waxaad baraneysa af Nederlandees. Waxaa Nederland ka baraneysaa arrimo kala duwan. Iyo sidaa aa anaga iskula dhaqanno dalkaan. Sidaas waxaa fursad u heleysaa in aad sida ugu dhaqsi badan aa uga qeybqaadatid bulshada dalkaan. Waxaad fiirisaa ama gashaa: www.inburgeren.nl. Ama soo wac: 050-599 96 00.

### Waxaa waajib ah in aad 3 sanno bulshada ku dhex gashid (inburgeren)

Waxaa qasab kugu ah in aad soo qaadatid shahaado. Waxaad heysataa muddo 3 sanno ah. Wuxuu kaaga bilaabanayaa maalinta aad oggolaashada degganaashada lagu siiyey. Wax ma aqrin kartid ama wax ma qori kartid? Markaas waxaad heysata mudo 5 sanno ah. Waxaa ku soo gaaray warqad ka socota

hey'adda DUO. Hey'adda DUO ayaa nidaaminaysa bulsho dhexgalka dalka Nederland.

***Iska jir!***
Ma kuu suuro galeyso miyaa in aad inburgeren sameysid adigo sabab fiican haysatid? Ama af Nederlandeeska ma taqaana? Markaas waxaad gashaa www.inburgeren.nl. Website-kaas waxaa ku qoran waxaad sameyn kartid.

### Adiga ayaa dooraneysid wax barashada
Adiga ayaa af Nederlandees isbaraneysid. Adigo buug isticmaalaayo, ama CD, ama DVD, ama internetka. Ma rabtaa in aad dooratid casharka aa rabtid? Waxaad gashaa markaas: www.Blikopwerk.nl/inburgeren. Waxaad doorataa cashar oo adiga kugu fiican. Ku aadan shaqada aa taqaanid ama waxa aad soo baratay.
Waxaad tusaal ahaan dooraneysa www.oefenen.nl. Tan oo lacag la'aan ah.

### Lacag ayaad u deynsan kartaa casharkaan
Waxaad lacag ka deynsan karta DUO. Adiga laguma siinaayo lacagta. DUO waxay bixineysaa lacagta casharka iyo imtixaanka. Adiga waxaa xataa lacag u deynsan karta casharo kale oo ka mid ah: baritaanka aqriska iyo qoritaanka (alfabetisering).

Xaq ma u leedahay magan galyo qaxootinimo? Wakhtigii la rabey maad ku soo qaaday inburgerin-ka? Markaas waxna lagaama rabo in aad bixisid. Wakhtiga la rabay in aad ku soo qaadatid inburgerin-ka ma ka daahday? Markaas lacagta waad soo celineysa. Waxaad bixineysaa xataa lacag ribo ah.

Waxaad tahay qof qoys cusub sameysanaaya? Ama qof qoyskiisa loo keenaayo? Mararka qaardood markaas waad deynsa karta lacagta. Waxaa laga raba inaad lacagtaas iska soo celisid. Waad in aad bixisaa ribo.

*Deyntaas internetka aad ka codsaneysaa*
Waxaad aada www.inburgeren.nl. Waxaad garaacdaa 'mijn inburgering'. Waxaad isticmaaleysa DigiD aad leedahay. Qoraalkaan aad waxaad ka aqrisa karta warbixin dheeraad ah oo ku saabsan DigiD aad leedahay.

# Maxaa laga rabaa in aad ka oggaatid degganaashada Nederland

## Muuji ama is tus qofkaad tahay

### Mar walbo waxaad heysataa oo wadataa waraaqahaaga
Baasaboor, laysinka baabuurka ama kaarka aqoonsiga. Waraaqahaaga waa in ey ahaadaan kuwo dhicin.

***Iska jir!***
Waraaqahaaga qof kale ha iska siinin. Xataa qofka aad u shaqeysid (hey'adda aa u shaqeysid ama hey'adda shaqada ku dirtay).

### Nambarka sirta ee ku saabsan arrimaha dowladda: DigiD
Arrimo maa rabta in aad ka dhameysatid website oo dowladda leedahay? Markaas waxaa u baahantahay magac iyo nambar sir ah. Waxaa u naqaana taas DigiD. Waxaad gashaa www.digid.nl. Waxaad uu baahantahay BSN (Burgerservicenummer) sii aad u dalbatid DigiD.

# Guri ijaarasho ama gadasho

### Waxaad si kala duwan u ijaaran karta guri

Dalka Nederland waxaa jira 2 nooc ijaareyaal guryaha ah:

- Qof shaqsi ah ama shirkad: particuliere verhuurder aa loo yaqaan.
- Hey'ad oo guryo ijaarto: woningcorporatie aa loo yaqaan.

Badana waxaa raqiis ah in aad hey'adda guriyaga bulshada (woningcorporatie) ka ijaaratid guri.

### Waxaad ijaaran karta guryo kala duwan

Guryaha oo ijaarkooda ka badan € 699,48 (qeybta ijaarka xorka ah (Vrije sector huurwoning)). Ama guryaha oo ijaarkooda ka yar yahay € 699,48 (guryaha samafalka bulshada (Sociale huurwoning)). Guryaha oo samafalka bulshada waxay leeyihiin xeer hoosaad:

- Waxaad tahay 18 jir ama ka wayn.
- Dowlada Hoose wey ogtahay in aad deggantahay.
- Waxaad qeybta dukimiintis degganaasho oo sharciyan ah.
- Adiga waxaa laguu oggolyahay in ey ugu badnaan € 34.678 ku soo gasho canshuurta intaa laga goynin ka hor sannadki.

### Waxaad gadan karta xataa guri

Waxaad u tagi karta xafiis dalaal haddaad guri rabtid in aad guri gadatid.

### Mararka qaarkood waxaa laga yaba in ey dowladda lacag ku siiso haddaad guri ijaarato: loo yaqaan huurtoeslag

Ijaarka ma kugu badanyahay? Waxaa la fiirinaaya inta lacag ku soo gasho. Markaas waxaad codsan karta huurtoeslag. Lacagta caawinaadka oo huurtoeslag waxaa lagu siinaa kaliya markaad guryaha ijaarka oo samafalka bulshada aa deggan tahay. Waxad gashaa www.toeslagen.nl. Ama waxaad gashaa www.huurcommissie.nl. Meeshaas aa waxaa ka aqrisan karta warbixin ku saabsan inta u kharashka ijaarka yahay.

# Dowlad Hoose kasto waxay qabtaa canshuuro iyo xeer u gooni ah

Warbixin dheeraad ah ma rabta oo ku saabsan Dowlad Hooseedka degmadaada? Tusaal ahaan meeshaad baabuurka dhigan kartid? Ama khashinka? Markaas waxaad wacda ama u tagtaa xafiiska maamulka Dowlada Hoose. Ama waxaad gashaa website-ka.

### Waxaad lacagta siineysa Dowlada Hoose ee degmadda

Tusaal ahaan lacagtaas waxaa loogu tala galay boosaneeraha, khashinka, biyaha iyo guriga. Ma rabtaa in aad oggaatid inta aad bixineysid? Markaas waxaad wacda ama u tagtaa aqalka degmadda. Ama waxaad gasha website-ka.

### Waxaad ilaalineysid xeerarka u dhigan khashinka

Degmo walbo waxay qabta xeerar ku u dhigan khashinka. Tusaale ahaan: waxa aa furutada ama qudaarta ka goysid waxaa ku rideysa caag gooni ah. Ma rabtaa in aad oggaatid xeerka siduu yahay? Wac ama waxaad aada aqalka degmadda. Ama waxaad gashaa website-ka.

# Ka Shaqeeynta Nedeland

### Waxaad u baahantahay Burgerservicenummer wax la dhaho haddaad rabtid in aa shaqeysid

Burgerservicenummer (BSN) waxaa ku siineyso Dowlada Hoose. Waxaad gashaa: www.burgerservicenummer.nl iyo www.belastingdienst.nl.

### Mararka qaarkood waxaa heli karta caawimaad ku saabsan raadinta shaqada

Waxaad aadeysa meesha la dhaho Werkplein. Ma rabtaa in aad ogaatid meeshaa ey ku taalo Werkplein-ka? Waxaad gashaa: www.uwv.nl. Waxaad aadi karta xataa hey'ad dadka shaqo u raadiso ama ku caawiso.

### Waxaad soo qaadaneysaa dukumiintiskaaga

Ma bilaabeysa shaqo? Markaas qofka u shaqeyneysid aa u baahan warqadahaada: baasaboor ama kaar aqoonsi. Asaga aa wuxuu ka sameyna koobi.

### Mushaar waxaa ka heleysaa qofka u shaqeysid

Waxaa laga rabaa in aad canshuur ka bixisid mushaarka ku soo galo. Qofka u shaqeysid aa qeyb ka mid ah canshuurta ka bixinaayo. Qofka u shaqeysid waxaa ka heleysaa warqad ku qoran mushaarkaaga. Warqadaas waxaa ku qoran oo kale intaa canshuur oo qofka u shaqeysid kaa bixinaayo. Warqadaas waxaa la dhahaa loonstrookje. Qofka u shaqeysid wuxuu ka bixinaaya: bruto-loon (qeybta canshuurta). U krijgt: netto-loon (inta soo hartay).

### Waxaa canshuur ka bixineysaa lacagta ku soo gasho

Waxaad hey'adda canshuurta u sheegeysaa lacagta ku soo gashay. Waxaa waaye lacagta oo sanadka horre ku soo gashay. Taas waxaa sameyneysaa sanad walbo 1da abriil ka hor. Taas waxaa u naqaana gudbiska warbixinta lacagta ku soo gashay (aangifte belastingdienst). Mararka qaarkood lacag dheeraad ah aa bixineysa. Mararka qaarkood lacag aa ku soo noqoneyso. Waxaad gashaa: www.belastingdienst.nl. Ama waxaad wacda: 0800-0543.

### Qofka aad u shaqeysid waa inuu xeerka ilaaliyaa

Shirkado badan waxaa u degsan xeer: loo yaqaan cao. Waxaa u naqaana taas: cao (heshiis shaqo oo wadajir ah). CAO-ga waxaa ku yaal mushaarka iyo lacagta fasaxa aa xaq u leedahay in lagu siiyo. Shirkada ma qabto miyaa cao? Markaas xeerka wuxuu ku yaala buuga sharciga Sharciga aa dhiggaayo in aad ugu yaraan xaq u leedahay in lagu siiyo. Taas oo mushaarka ugu yar oo sharciyan (wettelijk minimumloon). Iyo intaa lacag oo fasax aad ugu yaraan xaq u leedahay in lagu siiyo. Waxaad gashaa: www.rijksoverheid.nl/minimumloon ama www.inspectieszw.nl.

### Waad sheegi karta qofka aad u shaqeysid hadii uusan xeerka ilaalinin

Adiga iyo qofka u shaqeysid waxaa idinka dhexeeyo heshiis:

- Waxaa lagu siiyaa miyaa lacag ka yar intaa uu sharciga dhigaayo? Arrintaas la socodsii: Inspectie SZW. Waxaad gashaa: www.inspectieszw.nl . Ama wac: 0800-5151.
- Inta ku qoran cao-da kayar maa lagu siiya? Ma ka tirsantahay isku tagga shaqaalaha (vakbond)? Markaas u sheeg isku tagga shaqaalaha aad ka tirsantahay in lagu siiyo lacagta sharciga ku qoran in ka yar. Isku tagga shaqaalaha oo loo yaqaan vakbond warbixin dheeraad hoos ka aqriso.

Waxaad tahay qof xafiiska shaqada soo diray:

- Inta ku qoran cao-da ma lagu siiya? U sheeg arrintaas qoladaan: SNCU (Stichting Naleving CAO voor Uitzendkrachten). Waxaad gashaa: www.sncu.nl. Ama wac: 0180-642530.

### Ma shaqeyn kartid waxbadan

- In ka badan 48 saac isbuuci. Mararka qaarkood waa la oggolyahay in aa in intaas ka badan aad shaqeysid.
- In eysan ka badanin 10 saacadood maalinti. Mararka qaarkood intaas ka badan waa la oggolayah.
- In eysan ka badanin 40 saac isbuuci markay tahay shaqo habeen.
- Waai naad waqti nasasho heshaa.

Waxaad gashaa: www.inspectieszw.nl. Shaqo miyaad sameysaa oo aad u badan? Markaas u sheeg taas qoladaa ilaalinta xeerka shaqada oo loo yaqaan: Inspectie SZW. waxaad gashaa: www.inspectieszw.nl . ama wac: 0800-5151.

### Waxaad ka shaqeysaa meel amni leh

Qofka u shaqeysid waxaa laga raba in uu meesha shaqada ee amni iyo caafimaad leedahay. Shaqo halis leh maad sameysa? Markaas waxaa laga raba qofka aad u shaqeysid in uu wax habeeyo. Tusaale ahaan dhar iyo koofi adag. Adiga ma laga rabo in aad bixisid. Waxaad gashaa: www.inspectieszw.nl. Shaqadaada ma laha miyaa amni? Taas u sheeg: Inspectie SZW. Waxaad gashaa: www.inspectieszw.nl . Ama wac: 0800-5151.

***Iska jir!***

Mararka qaarkood waxaa u shaqeynee qof xun. Waxaa laga yabaa in uu qofkaas si xun kugu shaqeeyo. Si fiican iskaaga jir waxaa saxiixeysid. Qofka aad u shaqeysid si xun muu kugu shaqeeya? Markaas u sheeg arrintaas: Inspectie SZW. Waxaad gashaa: www.inspectieszw.nl . Ama wac: 0800-5151. Waxaa rabtaa miyaa in la ogaanin qofka tahay? Markaas waxaad wacdaa Meld Misdaad Anoniem: 0800-7000.

### Waxaa laga yaaba in aad lacag heshid hadii aad shaqo la'aan noqotid

Taas oo u naqaano ceer loogu tala galay dadka shaqada ka joogsato (werkloosheids-uitkering ama WW). Ceertaas oo lagu siinaayo sida sharciga dhigay:

- Waxaad 36da isbuuc oo ugu dambeeyey ka shaqeysay 26 isbuuc.
- Waxaa qasab kugu ah in aad shaqo kale raadsatid.

Waxaad gashaa: www.uwv.nl.

### Waxaa laga yabaa in lacag lagu siiyo haddaad jiran tahay

Miyaad jiratay adigoo shaqo haysata oo heshiis ku xiran? Markaas qofka aad u shaqeysid ugu yaraan in u ku siiyo 70% ee mushaarka aad qaadatid waaye. Badana labada maalmood oo ugu horeeya waxna ma lagu siinaayo. Hadaad jiratid adigoo shaqo joogto ah aanan heysanin, markaas xataa waxaa laga yaaba inaad in lacag lagu siiyo. Intaa heleysid waxay ku qoran tahay sharciga. Sharcigaas oo ah mida jirrada (Ziektewet). Waxaad gashaa: www.uwv.nl.

### Waxaa laga yaaba in lagu siiyo lacag haddaad muddo dheer aa jiran tahay

Muddo ka badan 2 sanno maa jiran tahay? Markaas waxay fiirineysaa hey'adda UWV in aad ceer xaq u leedahay. Taas oo ah sharciga loo yaqaan WIA. Waxaad gashaa: www.uwv.nl.

### Waxaad furan karta shirkad

Waxaad u tagtaa Kamer van Koophandel haddaad warbixin dheeraad ah rabtid. Waxaad gashaa: www.kamervankoophandel.nl.

### Waxaad ka mid noqon karta hey'adda isku tagga shaqaalaha (vakbond)

Vakbond-ka wey ku caawinaayaan. Tusaale ahaan haddi adiga iyo qofka aad u shaqeysid oo khilaaf idin dhex yaalo. Ama haddi uu balammo cusub oo ku xiran shaqadaada la sameynaayo. Waxay kugu caawinaayaan xataa canshuurta iyo dhibaatooyin. Tusaal ahaan waxaa hey'addo isku tagga shaqaalaha ah: FNV (www.fnv.nl ) ama CNV (www.cnv.nl)

## Waxaa qasab kugu ah in aad gashid caymis ku saabsan kharashka jiradda

### Waxaa laga raba in aad gashid caymis caafimaad

Caymiska caafimaadka waxaa u habeyneesaa adiga iyo qoyskaaga. Hey'adda caymiska waxay bixineysaa qeyb ka mid ah kharashka oo cafimaadka. Tusaal ahaan kharshka dhaqtarka guriga, daawooyinka iyo isbitaalka. Caymiskaas waxaad ka galeysaa hey'ad caymis. Hey'addaha caymiska oo dhan waxay qabaan isku caymin: oo loo yaqaan basispakket. Midba mida kale ayey ka badantahay bixinta lacagta..

### Waxaad gali karta caymis dheeraad ah

Waxaad markaas bixineysa lacag dheeraad ah. Caruurta ilaa 18 sanno jirka waa lacag la'aan. Mararka qaarkood qofka u shaqeysid wuxuu la leeyahay heshiis gooni ah hey'addaha

caymiska kuwo ka mid ah. Badana markaas waa lacag ka raqiisisan. Waxaad gashaa: www.verzekeringssite.nl/zorgverzekering.

### Waxaa lagu siina kaar

Kaarkaas waxaad tusee haddaad cawimaad xagga caafimaadka aad u baahan tahay. Wili  ma helin kaarka? Mana aadeysa dhaqtar? Markaas waxaad qaadata warqadaha caymiska. Waxaa gasha: www.government.nl/issues/health-issues/health-insurance.

### Waxaa laga yaaba in lagu siiyo lacag loogu tala galay caymiska caafimaadka

Waxay ku saabsan tahay bixitaanka lacagaha caymiska caafimaadka. Taas oo ku xiran daqliga  qoyskaaga soo gasho bishi. Waxaa u naqaana lacagtaas zorgtoeslag. Waxaad gashaa: www.toeslagen.nl.

## Waxaa laga rabaa in aad dhaqtarka guriga aad qortid

### Mar walbo waad aadi karta dhaqtarkaaga guriga

Waxaad aada dhaqtar guri oo agtaada ku yaal. Waxaad weydiisaa in u dhaqtarkaaga noqon karo. Mararka qaarkood waxaa laga yabaa in uusan dad cusub qaabileynin.

### Mararka qaarkood waxaad aadi karta dhaqatiirta deg degga(huisartsenpost)

- Haddaad dhaqtar guri leedahay kaliya.
- Haddaad xanuun culeys ah ku haayo kaliya.

Habeenada kaliya iyo isbuuca dhamaadkiisa (sabdiga iyo axadda).

## Isbitaalka iyo arrimo caafimaad kale

### Haddaad halis ku jirtid waxaad wacdaa: 112

Haddi ey jirto arrin halis ah, waxaa wacdaa 112. Dab damiska, booliiska ama ambalaaska.

### Mar walbo waxaad heli karta caawimaad xagga caafimaadka

Caafimaadkaaga maa dhib kaa heysta? Markaas waxaad aadeysaa dhaqtarka guriga (huisarts). Dhaqtarkaas aa fiirinaayo wixii jiro. Waxaa u naqaana taas cawinaadka xaga caafimaadka oo kowaad (eerstelijnszorg). Tusaalo kale waxaa waaye: dhaqtarka ilkaha (tandarts), hey'adda arrimaha bulshada (maatschappelijk werk) ama qofka kugu caawinaaya dhaqdhaqaada (fysiotherapeut). Dhaqtar oo ka shaqeeya isbitaalka maa rabta in aad aadid? Waxaad aadi karta marka oo dhaqtarka kowaad ku ogolaado ama kuu diro kaliya. Waxaan u naqaana diritaan (verwijzing). Ma heysatid miyaa verwijzing? Markaas adiga aa bixineysid kharashka oo dhan. Haddi ey dhaaqac daran oo ka soo gaaray shil ama xanuun culus oo hal mar kuugu soo booday markaas mar walbo waxaad aadi karta cawimaadka kowaad oo isbitaalada. Waxaad mar walbo qaadata kaarka caymiska iyo aqoonsigaaga.

Dhibaato kale maa ku heysto? Markaas waxaa kowdi aadeysaa hey'adda arrimaha bulshada (maatschappelijk werk). Tusaale ahaan: ayaga waxay kaa caawinaayaan su'aalo ku saabsan arrimaha guriga iyo waxbarashada. Warbixin dheeraad ah maa rabta? Waxaad weydiisaa degmadda.

### Waxaad iska bixineysa € 360 sanad walbo

Hey'addaada caymiska wax walbo ma bixineyso. Adiga waxaad iska bixineysaa € 360. Taas waxaa u naqaana (eigen risico). Dhaqtarka guriga laakin ma bixineysid eigen risico. Isbitaalka maa u tagtay meesha aad ka tagi laheyd dhaqtarka guriga? Markaas booqashadaas adiga iska wada bixineysid.

## Dhalitaanka caruurta iyo xanaanadooda

### Wixii ku dhasho waxaad ka diiwaan galineysa degmadda

Waxaad u tagaysa degmadda oo cunugaaga ku dhashay. 3 maalmood gudahooda aad ugu tagaysa degmadda. Ma loo baahno in aad cunugaaga aad wadatid. Waxaad qaadata dukimiintiskaaga: baasaboor ama kaar aqoonsi. Cunugaaga waxaa loo sameynaa Burgerservicenummer (BSN).

*Laga bilaawo 2014 cunuga ku dhasho waxaad ka diwaangalin karta internetka*

Waxaad aada website-ka oo degmadda aad deggan tahay.

### Waxaad heleysa caawinaad haddaad caruur qabtid

Miyaad qabta cunug gaaraayo ilaa 4 sano? Markaas waxaa heleysa warqad oo ka socota kalkaalinta xaafadda. Taas oo ka

shaqeysa xafiiska talada caruurta (consultatiebureau). Meeshaas ee ku fiirinaayaan caafimaadka cunugaaga. Iyo sidaa u cunugaaga u koraayo iyo wax u baranaayo. Waxay kugu caawinaayaan xataa su'aalaha kale aa qabtid.

*Waxaad heli karta xataa caawinaad xagga koritaanka*
Degmooyinka badanaa waxay qabaan Xerada Dhalinyarada iyo Qoska (Centrum voor Jeugd en Gezin, CJG). Waxay kugu caawi karaan su'aalaha aad qabtid oo ku saabsan koritaanka. Waxaad gashaa: www.cjg.nl.

### Carurutaada si looga hor taggo jirooyin waa talaala

Taas oo ku aadan caruurta ilaa 12 sano jiraan. Talaalka oo ka hor taggaayo jirooyinka halis leh. Tusaal ahaan gawracatada, xiiqdheerta, dabaysha iyo teetanaha. Talaalka waa lacag la'aan.

*Waraaqad oo ku saabsan talaalka waa lagu soo diraa*
Cunugaaga waxaa lagu talaala xafiiska talada caruurta (consultatiebureau). Ama waxaa u tageysa hey'adda caafimaadka degmadda oo loo yaqaan GGD (Gemeentelijke Gezondheids Dienst). Warbixin dheeraad ah miyaad rabta? Waxaad weydiisa degmadda. Ama waxaad gashaa: http://www.rivm.nl/Onderwerpen/Onderwerpen/R/Rijksvaccinatieprogramma/National_Immunisation_Programme.

### Caruurtaada waa inay iskool aadaan

Caruurtaada waxaa qasab ku ah in ey iskool aadaan wixi laga bilaawo 4 sano. Ilaa ay ka gaaraayaan 18 sano. Waxaa muhiim ah in ey caruurtaada shahaado soo qaataan. Waxaad gashaa www.rijksoverheid.nl/onderwerpen/leerplicht.

### Caruurtaada waa lagu haayn kara wakhtigaad shaqeyneysid

- Laga bilaawo 0 - 4 sano: xanaaneynta caruurta aad u yar (kinderopvang)
- Laga bilaawo 2 - 4 sano: xanaaneynta caruurta yar (peuterspeelzaal)
- Laga bilaawo 4 - 12 sano: xanaaneynta iskoolka marka laga baxo kadib

Caruurta laga haynaayo kharash aa ku xiran.

### Cunugaaga waxaa sii dheeraad loogu dadaali kara barashada af Nederlandeeska

Waxaa taas lagu sameyn kara goobta xanaaneynta caruurta (kinderopvang ama peuterspeelzaal). Warbixin dheeraad ah miyaad rabtaa? Waxaad weydiisa demadda aa deggan tahay.

### Waxaa macquul ah in lagu soo celiyo lacag loogu talagalay haysmada caruurta

Waxaa anaga taas u naqaan kinderopvangtoeslag. Waxaad gashaa: www.toeslagen.nl. ama waxaad gashaa www.rijksoverheid.nl/onderwerpen/kinderopvang.

# Ce que vous devez savoir sur vos droits et sur l'aide

## Maxaa lagaa raba in aad ka oggaatid xaqaaga iyo cawimaad

Dalka Nederland waxaa ka jira Xaquuqda Caalamiga oo Beni Aadanka.

- Qof walbo asaga ayaa go'aansanaaya wuxuu sameynaayo (go'aan shaqsiyan) taas oo ilaa xad sharci ah.
- Marna la ma ogolo in qof la canaado.
- Jirdil marna la ma ogola.

### Anaga raga iyo dumarka si isku mid ah ayaan u la dhaqanna

Xaqqa iyo waajibka ragga iyo dumarka waa isku mid dalka Nederland. Ragga iyo dumarka isku lacag waaye in la siiyo haddey isku shaqo qabanaayaan.

### Adiga ayaa dooran kartid qofkaad guursaneysid

Qof in lagu qasbo guur waa mamnuuc. Qof maad ku qasabtay guur? Markaas waxaa macquul ah in aad xabsiga gashid. Adiga maa lagugu qasbay guur? Markaas waxaad dhihi karta maya. Sii qasab ah maad ku guursatay? Markaas caawimaad aad weydiisa karta:

- Halis maa jirto? Wac 112.
- Goobta Caawimaadka Dilitaanka Guriga (Steunpunt Huiselijk Geweld): 0900-126 126.
- Taleefanka caruurta: 0800-0432. Ama waxaad gashaar: www.kindertelefoon.nl, www.alsniemandietsweet.nl, www.hallokezban.nl, www.chatmetfier.nl.

### Waxaa dalkaan la ogolyahay in aad qaniis ama qaniisad tahay

Dalka Nederland qof walbo waxaa loo arka isku mid. Kala ma jecla in qofka u yahay qaniis ama qaniisad. Laakin dadka kale sii kale mey u fikirayaan? Qofna la ma hadli kartid miyaa? Qofna kala ma hadli kartid miyaa? Markaas waxaad codsan karta caawimaad:

- Veilige Haven Amsterdam: www.veiligehavenamsterdam.nl/content.php.
- Veilige Haven Oost: www.veiligehavenoost.nl.

### La ma oggola in lagu cunsuriyeeyo

Qofna loo ma ogola in uu si ka duwam dadka kale kugula dhaqmo. Maadama aad meel kale ka timid. Ama maadama aad midab kale qabtid. Waxaan taas u naqaana cunsurinimo. Ma lagu cunsuriyeeyey? Markaas waad soo gudbi karta arrintaas:

- Anti Discriminatie Bureau. Waxaad ka gashaa: www.discriminatie.nl.
- Waxaad gashaa: www.rijksoverheid.nl/onderwerpen/discriminatie/aangifte-doen-van-discriminatie.

### Gabdhaha lama oggolo in la guddo

Guditaanka dhabdhaha waa mamnuuc. Guditaanka gabdhaha waa arrin ciqaab saaran: Guditaanka gabdhaha waa jirdil caruur oo culeys ah.

- Ka qeebqaadashada guditaanka gabdhaha waa laguugu ciqaaba xaga sharciga.
- Waxaad guditaanka gabdhaha u sheegi karta AMK (Advies en Meldpunt Kindermishandeling www.amk.nl) ama booliiska, xataa haddii uu qofka dembiga galay oo dalka Nederland deganeyn ama gabadha oo dal kale lagu soo guday.

### Ma lagu guday? Marna arrintaas lagugu ma eedeynaayo ama ciqaabaayo

Maadama aad hada caawimaad ka heli kartid arrintaas. Tusaal ahaan cawinaad oo dhaqtar.

Ma rabta qoraalkaan oo af kale ku qoran?
Waxaa markaas aada ama gashaa: www.nieuwinnl.nl ama www.newinthenetherlands.nl

## Wixii aqbaar dheeraad ah

Qoraalkan waxaa la isugu dubariday si daryeel weeyn leh. Wixii khaladaad ah ama aanan dhameeystirneen taasoo quseysa qoraalkan, Wasaaradda Arrimaha Bulshada iyo Shaqada marna masuul iyo eed kama qaadi karto mana la saari karo. Waxa uu ka koobanyahay dukumeentigan xitaa wax sharci ah oo qabankaro majiraan.

Aqbaar dheeraad: www.rijksoverheid.nl

Ministry of Social Affairs and Employment
Postbus 90801
2509 LV Den Haag

Maart 2014 | S73-627917 | Somalisch

Photography: www.mieke-ann.nl